



Ka ilaalinta amaanka caruurta iyo dhalinyarta shucaaca iyo argagixisada:

Talada waalidiinta iyo daryeelayaasha



Hordhac

Ingiriisku wakhtigan waxa soo wajahday khatar badan oo argigixiso la xiriir ku jirnimada diimeed iyo fikir, iyo kooxo ku ololeeya dagaal si ay u gaadhaan hadafkooda ayaa ka shaqeeya Ingiriiska, oo onleyn wax soo geliya.

Dadka yaryarah ee ay isasoo gaaraan aragtida kooxaha xag jirka ah waxay dooni karaan inay fuliyaan waxa ay aaminsan yihiin; waxay geli karaan dambi ama ficilo xad gudub ah oo markaa waxay naftooda iyo dadka kaleba gelin karaan khatar waxyeelo.

Dadka yaryar, qayb wayn oo korniinkooda kamid ahi waxaa weeye inay baadhaan fikiro cusub iyo inay si adag u su'aalaan caalamka ku xeeran, oo waa in taas la dhiiri geliyaa si uga caawiso inay koritaan fahankooda caalamka oo ay bartaan qiimaha adkaysiga iyo aqbalaada. Laakiin, tan waxaa loo baahan yahay in la isku dheel tiro baahida ka ilaalinta Dadka yaryarah xag jirnimada iyo aragtida fog.

Warqadan waxaa loogu talo geley inay ka caawiso waalidiinta iyo daryeelayaasha inay aqoonsadaan marka ilmahoodu uu ku jiro khatarta xagjirnimada iyo halka looga doonayo kaalmo Haddii ay ka warwaraan.

If you need a copy of this booklet in another language please contact the Camden Safeguarding Children Partnership on **020 7974 8716**.

Haddii aad ku doonayso nuqul buug-yarahan ah luuqad kale, fadlan la xiriir **020 7974 8716** (Guddiga Dhawrida Carruurta Camden — Camden Safeguarding Children Board)

অন্য ভাষাতে আপনার যদি এই পুস্তিকার একটি কপির দরকার হয় তাহলে দয়া করে **020 7974 8716** নম্বরে যোগাযোগ করবেন (ক্যামডেন সেফগার্ডিং চিলড্রেন বোর্ড)

إذا كنت ترغب في الحصول على نسخة من هذا الكتيب بلغة أخرى، يرجى الاتصال بهاتف رقم **020 7974 8716** (مجلس كامدن لحماية الأطفال)

Waa maxay xagjirnimadu iyo xagjirka?

'Xagjirnimada" waxaa weye marka uu qofku qabo aragti aanu u dul qaadan dadka ka aragtida, qoomiyada, dhaqanka, diinta, jinsiga ama aqoonsiga jinsiga duwan oo markaa kasoo horjeeda mabda'da aas aasiga ah iyo xeerasha dimuqraadiyada, xoriyada qofka iyo sharciga.

'Xagjirku' waxaa weeye marka uu qof wado qorshaha uu ku taageerato fikirka argagixisada iyo ururada xag jirka ah ee kooxda aragagixisada. Dadka xagjirka ah waxa ay isku dayaan inay ku qanciyaan dadka halgankooda iyada oo ku qancinaya aragtidooda ay caalamka ka qabaan inay saxsan tahay oo ku dhiiri gelinaya inay qaadaan talaabo ay ku badalayaan caalamka si ay u buuxiyaan aragtidooda xag jirnimo.

Camden iyo aragtiyaha onleynka ah ee u ololeysa waxyeelada ama nacaybka, gaar ahaan koox gaar ah ayaa ka jirta. Tusaale ahaan aragtiyadan waxa kamid ah aragtiyada loogu yeedhi karo Neo Nazi ama Saraynta Cadaanka ama aragtiyada loo yaqaan kooxaha Islaamiyiinta sida Daacish iyo Alqaacida.

Maxay Dadka yaryarahi u noqdaan xag jir?

Inta ay ku jiraan dhawr iyo toban jirada, Dadka yaryarah waxay korodha madax banaanidooda, oo waxya baadhaan fikiro cusub oo waxay samaystaan aragti u gaar ah; taas ayaana keentey inay u nuglaadaan khatarta inay isasoo gaadhaan dadka xagjirta ah. Sababaha Dadka yaryarah ay u qaataan fikirada xagjirka ah way badan yihiin oo wayna kala duwan yihiin, laakiin waxaa kamid noqon kara kuwa soo socda:

- waxay isku dayayaan inay nolosha macno u sameeyaan
- waxay u arkaan in dhaqankooda, qaabka ay u nool yihiin ama diintoodu ku jirto khatar
- waxay dareemayaan dareen dhaqan ama inay ka tirsan yihiin wax
- waxay doon doonayaan xiise ama xaraabaad
- waxaa kaga yimid cadaadis loodkooda kuwaas oo ay dhici karto inay ku xiran yihiin kooxahan.

Sidee dadka yaryar ay xagjir u noqdaan?

Ma jirto qaab kaliya oo dadka yaryar ay u noqdaan xag jir; waxay la xiriiri karaan qof ay aragtidiisa ka helaan, oo markaa kooxaha xagjirka ah ayaa isku daya inay markaa si kasii badan ugu qanciyaan waxa ay aaminsan yihiin. Waxay kuwani noqon karaan dad dhawaan ay kulmeen ama dad ay hore u yaqaaneen oo kamid ah qoyska iyo asxaabta.

Sanadahan danbe baraha bulshada ayaa noqdan madalo caamk aah oo aragtiha xagjirka iyo kooxdaha xagjirka, taas oo u suurto gelisay aragtiyahaas in markaba iyo dhakhsaba loo heli karo. Dadka yaryar qaar ayaa dhici karta arki kara aragtiyada xagjirnimada inta ay baadhayaan onleynka. Aragtiyada ayaa lagu wadaagi karaa kutiri kuteen ama 'doodo' kuwaas oo u muuqda kuwo aan waxyeelo lahayn laakiin waxay qofka dhalinyarta ah soo jiidan karaan iyaga oo aan ogayn.

Dadka qaar yar ayaa xagjir noqon kara marka ay akhriyaan macluumaad onleyn ah inta ay ku jiraan internetka iskood iyaga oo aan la xiriirin koox xagjir ah.

Kooxaha xagjirka ah waxaa lagu yaqaanaa inay isticmaalaan baraha bulshada sida Ask FM, 4chan, 8chan iyo Telegram si ay usoo dhigaan macluumaadka oo ay dadka ula xiriiraan maadaama oo websaytyadan ay adag tahay in la daba galo oo la garto aqoonsigooda. Dhamaan macluumaadka app-kan maaha xagjir oo waxaa muhiim ah in la ogaado in kooxaha argagaxisada iyo xagjirka ah ay badanaa badanaan meesha ay joogaan, magacooda iyo macluumaadkooda si ay u qarsoonaadaan.

Waa maxay calaamadaha ay tahay in lala socdo?

Ma jirto liis dhamaystiran oo calaamadaha xagjirnimada ah laakiin kuwa soo socda ayaa keeni kara walaac:

- inuu ilmuhu qariyo hawlaha onleynaka ah iyo isticmaalka baraha bulshada
- isbadal aragtiyada iyo sheegitaanka aragtiyada xagjirka ah
- isbadal dharka uu xidho iyo/ama muuqaalka ama kooxda asxaabta
- dul qaadasho la'aan kooxda, diimaha, ama aragtiyada siyaasadeed ee kale
- sheegitaanka aragtiyada iyo isticmaalka luuqada aan u muuqan inay tisi tahay (hadal lasoo qoray)
- inuu u arko in dhaqankiisa ama diintiisu ay khatar ku jirto oo kaliya dagaal ama rabshad ay xalin karto
- u qushuucida fikirada mala awaalka ah ee la xiriira xagjirnimada

Sidee ayay waalidku u ilaalin karaan amaanka dhalinyartooda?

- In lala yeesho **xiriir kalsooni** ku dhisan ilmahaaga si uu u ogaado in uu kaalmo ku waydiisan karo Haddii uu sameeyay khalad ama uu mushkilad galay.
- Inaad **kala sheekeysato** ilmahaaga Haddii aad wax ka walaaco. Inaad ka dalbato inuu kuu sheegto aragtidiisa iwm. Isku day inaad dhagaysato oo aad si kale u arag/sasin.
- Inaad xaqiijiso in aad ogtahay meesha uu ilmahaagu joogo iyo cida Raadi arimaha ku saabsan ilmahaaga saaxiibbadiis iyo qoysaskooda.
- Ka caawi ilmahaaga **inuu ogaato waxa muhiimka ah** ee ku saabsan waxa uu ku arko TV ama internetka; in lagu dhiiri geliyo iyada inuu dadka kalena aragtidooda eego iyo in laga caawiyo sidii uu dadka kale ugu dulqaadan lahaa.
- In lala socdo hawlaha onleynka ah ee ilmahaaga iyo in la eego websaytka baraha bulshada ee uu booqanayo. Inaad ka warbixinso oo aad boloog garayso wixii websayt ah ee aad ka walaacdo.
- Inaad xasuusiso ilmahaaga in dadka ay kula xiriirayaan internetka ay dhici karto inayna runto oo dhamaystiran u sheegeynin oo ay dhici karto inayna u sheegaynin wixii waxyeelo ee iman karta. **Haddii laga codsado inay wax qarsadaan markaa waxay halis ugu jiraan inay waxyeello soo gaarto.**
- Waxa aad ka doonataa kaalmo xubnaha kal ee qoyska ama bulshada cida uu ilmahaagu qadariyo.
- Haddii ay jirto khatar ah in ilmahaagu ay dhici karto inuu ka tago dalka, **ka taxadir** sida inaad ka dhigto baasboorka meel aanu garanaynin iyo inaad yarayso lacagta uu heli karo.
- Waxa aad sidoo kale kala hadli kartaa **macalimiinta ilmahaaga**; dugsiga ayaa kuula socon doona wixii calaamado ah ee ardayda ah ee ah inay bartilmaameedsadeen kooxda xag jirka ah oo way caawin karaan ama waxa ay u gudbin karaan ilmahaaga caawimaad Haddii ay jiraan calaamado sheegaya inuu xagjir noqday.

Halka laga heleyo kaalmo

■ Khadka Talada Kahortaga Bilayska Qaran

Si kalsooni leh u wac, si aad walaacyadaada ula wadaagto saraakiisha ka-hortagga ee sida gaarka ah u tababaran.

0800 011 3764

■ Adeega Xiriirka Caruurta iyo Qoyska Camden

Camden wixii walaac ah ee in ilmahaagu uu xagjir noqday waxaa loo arkaa ka faa'adaysi iyo cumaamasho cid. Camden waxay kaala hadli doontaa walaacyadaada oo waxay kaaga dooni doontaa kaalmada aad u baahan tahay Adeegyada Kaalmada Hore, Adeegyada Daryeelka Bulshada ama Kahortaga

LCBMASHadmin@camden.gov.uk

020 7974 3317

■ Kooxda Kahortaga Camden

Waxa aad sidoo kale ugala xiriiri kartaa si toos ah kooxda Kahortaga

prevent@camden.gov.uk

Halka laga heleyo kaalmo

Dhamaan xirfadyalaasha ku jira ayaa kula wada shaqayn doona adiga iyo ilmahaaga si ay u arkaan nooca taageerada ka ilaalinta ilmahaaga ee inuu noqdo xagjir.

Haddii ilmahaagu uu qabo **baahi gaar ah, laxaad la'aan ama xanuun maskaxda ah** waxa uu weli noqon karaa xagjir oo waxa uu u baahan karaa kaalmo.

Waa in aanad dib u dhicin sheegida wixii walaac ah iyo doonashada kaalmada.

Websaydyo waxtar leh

Wixii macluumaad iyo talo ah ee xagjirnimada iyo waxa aad samaynayso:

■ **Act Early**

www.actearly.org.uk

■ **Wax Ka Bar Nacaybka**

<https://educateagainsthate.com/parents/>

■ **Aaynu Ka Hadalno Arin kusaabsan**

<https://www.ltai.info/>

Ka caawinta waalidka inay si dhaanta fahmaan Kahortaga iyo sida ay dadku u joojinayaan inay soo jiitaan argagixisadu

■ **La Dagaalanka Warwarka iyo**

Jahwareerka Qoysaska

<https://www.familiesmatter.org/familiesmatter.org.uk/index.html>

Wixii talo ah ee ku saabsan yaraynta xagjirnumada qoyska dhaxdeeda ah

■ **Talaabooyin Yaryar/ka Bixidda UK**

<https://smallstepsconsultants.com/leaving-the-far-right/>

Khabiirada xagjirnimada Far Right oo siin kara talo iyo taageero Haddii uu qof uu ai qoto dheer u dhax galay.

Wixii macluumaad iyo talo ah ee amaanka onleynak/ iyo kormeerka dhijitaalka ah:

■ **NSPCC**

<https://www.nspcc.org.uk/keeping-children-safe/online-safety/>

■ **Interneet Ammaan ah**

<https://www.saferinternet.org.uk/>

■ **Net-Aware**

www.net-aware.org.uk

■ **Arimaha Interneetka**

<https://www.internetmatters.org/issues/radicalisation/dealing-with-radicalisation/#deal-with-radicalisation>

■ **Think U Know -Ka**

Faa'idaysiga Ilmaha iyo Xarunta Ilaalinta Onleyna (The Child Exploitation and Online Protection Centre, CEOP)

www.ThinkUKnow.co.uk

■ **Ka warbixi Argagixisadda**

khadka tooska ah looga shakisan yahay -wixii ka warbixin ah ee onleynka ee xag jirnimada iyo argagixisada
<https://www.gov.uk/report-terrorism>